**PORTLAND PUBLIC SCHOOLS**
**Office of Civil Rights**

501 North Dixon Street | Portland, OR 97227
(503) 916-2000 | civilrights@pps.net

**Ogeysiiska Sannadlaha ah ee Aan Takoorka Lahayn iyo U Hoggaansanaanta Xuquuqda Madaniga (Sanad Dugsiyeedka 25–26)**

Ardayda, Qoysaska, Shaqaalaha, iyo Xubnaha Bulshada ee Dugsiyada Dadweynaha ee Portland,

Dugsiyada Dadweynaha ee Portland (PPS), waxaan ka go'an in aan ilaalinno deegaan waxbarasho iyo shaqo oo ka caagan takoorka, dhibaataynta, cagajuglaynta, xadgudubka, iyo aargoosiga. Maadaama aan nahay degmada dugsiyada dadweynaha, waxaan difaacnaa xuquuqda dhammaan ardayda, shaqaalaha, iyo qoysaska si ay si buuxda oo caddaalad ah uga qayb qaataan barnaamijyada, adeegyada, iyo hawlaha degmada.

Iyadoo la raacayo sharciyada xuquuqda madaniga ee federaalka iyo gobolka—oo ay ka mid yihiin balse aan ku koobnayn Title IX, Title VI, Qodobka 504 ee Xeerka Soo-kabashada, Xeerka Maraykanka ee Naafada (ADA), iyo Sharciyada iyo Xeerarka Maamulka ee Oregon—PPS waxay mamnuucday takoorka ku saleysan:

- Jinsiyada
- Midab
- Asalka qaranka
- Jinsiga
- Jihaynta galmada
- Aqoonsiga jinsiga ama muujintiisa
- Diinta
- Naafonimada
- Da'da
- Xaaladda guurka
- Xaaladda halgamaha ama ciidamada
- Xaaladda qoyska

Shuruudahan aan takoorka lahayn waxay khuseeyaan dhammaan barnaamijyada waxbarashada ee PPS, hawlaha waxbarasho ee dheeraadka ah iyo kuwa ka baxsan manhajka, cayaaraha, shaqaalaynta, iyo helitaanka xarumaha, tignoolajiyada, iyo agabka waxbarasho.

**Ballanqaadka Degmada:** Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee PPS ayaa mas'uul ka ah hubinta in dhammaan degmada ay u hoggaansanto sharciyada iyo siyaasadaha xuquuqda madaniga. Shaqadeennu waxay dhiirrigelisaa dhaqan degmada oo taageera sinnaanta, helitaanka adeegyada, iyo wanaagga arday kasta. Tan waxaa kamid ah:

- Isu-duwidda jawaabaha ku saabsan cabashooyinka iyo welwelada la xiriira xuquuqda madaniga

PORTLAND PUBLIC SCHOOLS
**Office of Civil Rights**

501 North Dixon Street | Portland, OR 97227
(503) 916-2000 | civilrights@pps.net

- Baadhista eedeymaha takoorka, dhibaataynta, cagajuglaynta, iyo xadgudubka
- Taageeridda hababka xallinta ee ku saleysan dugsiga iyo qorsheynta ammaanka
- Kormeeridda u hoggaansanaanta xuquuqda madaniga ee la xiriirta edbinta ardayda, barnaamijyada, iyo adeegyada
- Bixinta tababar shaqaalaha, ardayda, iyo qoysaska ee ku saabsan sharciyada xuquuqda madaniga, oo ay ku jiraan Title IX iyo Title VI
- Ilaalinta habraacyo cabasho oo hufan, waqtigooda ku habboon, kana warqaba dhaawacyada maskaxeed
- Isku waafajinta dhammaan habraacyada xeerarka federaalka, Xeerarka Maamulka ee Oregon, iyo siyaasadda PPS

Dhammaan dadka ka qayb qaadanaya bulshooyinka dugsigeenna—hadday yihiin arday, shaqaale, qoysas, ama booqdayaal—waxay xaq u leeyihiin inay helaan oo ka qayb qaataan barnaamijyada PPS iyaga oo aan ka baqayn badbaadadooda ama wanaaggooda.

**Sida Loogu Warbixiyo Welwel:** Warbixinno ama cabashooyin ku saabsan takoorka, dhibaataynta, cagajuglaynta, aargoosiga, ama jebinta xuquuqda madaniga kale waxaa soo gudbin kara arday, waalidiin, mas’uuliyiin, shaqaale, ama xubno ka tirsan bulshada. Warbixinnada waxaa lagu soo gudbin karaa af ahaan ama qoraal ahaan wakhti kasta, warbixinnada aan magaca lahaynna waa la eegi doonaa oo wax laga qaban doonaa intii suuragal ah.

**Foomka Cabashada Isku Midaynta:** Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waxay ku boorinayaan isticmaalka Foomka Cabashada Isku Midaynta ee PPS marka la gudbinayo cabasho rasmi ah. Foomkan waxaa lagu soo gudbin karaa khadka tooska ah ama qoraal adag, waxaana laga heli karaa bogga internetka ee degmada ama marka lagu codsado dugsiyada iyo xafiisyada degmada. Degmadu waxay ku talinaysaa in la raaco tallaabooyinka kordhinta ee lagu qeexay boggeena “Hababka Ugu Wanaagsan ee Warbixinta Welwelka Dugsiga”.

Marka cabasho la soo gudbiyo, baaraha loo xilsaaray—sida Sarkaalka U Hoggaansanaanta Dugsiga, maamulaha dugsiga, ama shaqaalaha xuquuqda madaniga ee degmada—ayaa raaci doona, xaqiiqooyinka baari doona, kadibna soo saari doona jawaab qoraal ah oo ku saabsan natiijooyinka.

**PORTLAND PUBLIC SCHOOLS**
**Office of Civil Rights**

501 North Dixon Street | Portland, OR 97227
(503) 916-2000 | civilrights@pps.net

**U Soo Gudbi Warbixin Mas'uuliyiinta Dugsiga ama Degmada:** Ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha waxaa sidoo kale lagu dhiirigelinayaa in ay si toos ah ugu soo gudbiyaan walaacyadooda maamulka dugsiga ama Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee PPS. Dugsi kasta oo ka tirsan PPS waxa uu leeyahay Kooxda Isku-xidhayaasha Title IX iyo Title VI oo loo xilsaaray, kuwaas oo ah barta xiriirka ee maxalliga ah ee arrimaha la xiriira takoorka iyo dhibaataynta. Liiska dhamaystiran ee isku-xidhayaasha ku salaysan dugsiyada waxa laga heli karaa mareegta Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee PPS. Si aad cabasho u gudbiso ama taageero u codsato, fadlan la xidhiidh:

- **Dr. Bobby J. Cruz**
  Agaasimaha Xuquuqda Madaniga iyo Title IX/VI/Division 22 Official
  bcruz@pps.net | 503-916-3340
- **Jeffrey Wiser**
  Maareeyaha Sare ee Xuquuqda Madaniga / Isku-xidhaha Cabashada
  jwiser@pps.net | 503-577-8095
- **Jey Buno**
  Madaxa Adeegyada Taageerada Ardayda / Isku-xidhaha ADA
  buno@pps.net | 503-916-5460
- **Katie Loewen**
  Maamulaha Barnaamijka 504 kloewen@pps.net | 503-916-3337

**Siyaasadaha iyo Habraacyada Khuseeya:** Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waxay hayaan siyaasado iyo tilmaamo maamul oo badan si loo taageero u hoggaansanaanta loona hubiyo caddaaladda marka laga jawaabayo walaacyada xuquuqda madaniga. Kuwaas waxaa ka mid ah:

- 4.30.063-AD: Dhibaataynta Galmada – Title IX
- 4.30.070-AD: Ka-hortagga Takoorka / Ka-hortagga Dhibaataynta / Ka-hortagga Aargoosiga
- 4.30.072-AD: Dhibaataynta Galmada ee Ardayda Is-dhexmaraysa
- 4.50.050-P: Akhlaaqda Ardayga iyo Anshaxa
- 4.20.042-AD: Xakameyn iyo Go'doomin
- 4.30.071-AD: Dhacdooyinka Takoorka iyo Hadallada Nacaybka
- 4.20.051-AD: Ka-hortagga Takoorka Naafada – Qodobka 504 iyo ADA

Dukumentiyadani iyo kuwo kale oo la xiriira waxaa si guud looga heli karaa mareegta PPS qaybteeda *Siyaasadaha & Tilmaamaha Maamulka*.

**PORTLAND PUBLIC SCHOOLS**
**Office of Civil Rights**

501 North Dixon Street | Portland, OR 97227
(503) 916-2000 | civilrights@pps.net

**Turjumaadaha iyo Helitaanka:** Ogeysiiskan waxa lagu heli karaa luqado kala duwan iyo qaabab kale oo beddel ah haddii la codsado. PPS waxa ka go'an helitaanka luqadaha iyo fududeynta adeegyada. Si aad u codsato turjumaad afka ah, qoraal, ama adeegyada ADA, fadlan la xidhiidh Xafiiska Xuquuqda Madaniga ama maamulka dugsigaaga.

Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waxay aaminsan yihiin in arday kasta uu xaq u leeyahay inuu dareemo ammaan, ixtiraam, iyo taageero dhammaan deegaanada dugsiga. Dhamaanteen waxaan wadaagnaa masuuliyadda ilaalinta xuquuqda madaniga, dhiirigelinta sinnaanta, iyo hubinta habraacyo ka mid noqosho leh guud ahaan degmada.

Waxaan ka go'an in aan dhisno nidaam dugsiyeed uu arday kastaa ku jiro laguna qiimeeyo cod kasta.

**Bulsho ahaan iyo ixtiraam ahaan,**

**Dr. Bobby J. Cruz**
Agaasimaha Xuquuqda Madaniga
Dugsiyada Dadweynaha ee Portland
civilrights@pps.net | 503-916-3340